## Ma la socotaa:

**Inay jirto macluumaad baaris cilmiyeed ku salaysan oo cadaynaya in la galmooshada qofka kugu jinsiga ah ay tahay mid caadi ka ah nolosha xayawaanka, taas oo la cadeeyay inay ka dhex dhacdo in kabadan 1500 nooc oo xayawaanka ah. Arinkani maaha mid ku kooban isla galmoosho oo kaliya ee waa mid keenaysa in laba qof is doortaan oo ay noloshooda inta ka dhiman wada qaybsadaan.**

## Meelaha aad ka heli karto macluumaadka muhiimka ah:

**Skeiv Verden**
- Waa koox iyo meel bulsho oo loogu talo galay dadka jaaliyadaha ajaanibka ah, ee dareemaya inay jecelyihiin, doonayaana inay la galmoodaan, ee dareenkooduna soo jiito qofka jismigoodu la midka yahay. (Sida nimanka jeclaada raga kale, ama haweenka jeclaada haweenka kale).
Taleefoon lambarkoodu waa: 928 95 737
Cinwaanka e-mail-koodu waa : info@skeivverden.no
Bartooda inter-nett-ka waa : www.skeivverden.no

**Urur waynaha xoreeynta khaniisiinta raga iyo haweenkaba leh**
- Waa urur wayn oo wadanka oo dhan ka jira oo si siyaasadeed iyo mid bulsheedba ugu shaqeeya sidii ay khaniisiinta raga iyo haweenkaba leh( homofile & lesbiske), iyo waliba kuwa raga iyo haweenkaba la galmooda ama ( bifile) ay si cad oo xor ah ugu noolaan lahaayeen sidii ay doonayaan iyagoon wax cabsi ah ka qabin in bulshada laga takooro ama dhexsaaro, ama loo hanjabo. Ururkan wuxuu laan ku leeyahay Oslo. Taleefoon lambarkoodu waa : 22 10 39 39 ama 22 41 11 33
Cinwaanka e-mail-koodu waa :
post@llh.no ama oslo@llh.no
bartooda inter-nett-ka waa :
www.llh.no ama www.llh.no/oslo

**Degmada Oslo, qaybta kala duwanaanta iyo is dhexgalka( EMI)**
EMI waxay masuul ka tahay la socoshada howlgalo fara badan oo ka mid ah qorshayaasha degmada Oslo ugu talo gashay sidii looga hor tagi lahaa takoorida khaniisiinta raga iyo haweenkaba leh (homofile & lesbiske), iyo waliba kuwa raga iyo haweenkaba la galmooda ama (bifile) iyo waliba sidii loo heli lahaa -kala duwanaan iyo – sinaan. Waxay qaybtani soo daabacdaa bog laga daalacdo macluumaad ku saabsan , looguna talo galay khaniisiinta, oo lagu magacaabo " Skeive sider" kaas oo laga heli karo barta inter-nett-ka ee: www.oslo.kommune.no/oxlo

**Kooxaha caalamiga ah ee taageera khaniisiinta, eheladooda iyo saaxiibadood:**
Dhamaan barahan ama bogagan waxaa laga heli karaa macluumaad , waxayna kugu sii xiriirin doonaan meelaha kale ee macluumaadka la mid ah laga heli karo.

- Parents, families, and freinds of lesbians and gays(PFLAG), www.pflag.org
- Al-fatiha foundation, www.al-fatiha.org
- Imaan, www,imaan.org.uk

Lobo Media 43857 –Foto: Mariof – Oversatt ved Tolketjenesten i Oslo, mars 2008

Oslo kommune
**Bydel Grünerløkka**
Enhet for mangfold og integrering

skeiverden

LLH
Landsforeningen for lesbisk og homofil frigjøring
OSLO OG AKERSHUS

# Wiilkaagu ma yahay mid ka hela oo dareenkiisu soo jiito wiilasha kale, ama gabadhaadu ma tahay mid ka hesha oo dareenkeedu soo jiito gabdhaha kale?

## – Ama ma taqaan qof sidaas oo kale ah?

Waalid fara badan ayay la tahay ama noqotaa wax naxdin leh marka ay caruurtoodu u sheegaan inay ka helaan oo dareenkoodu soo jiito qof ay isku jinsi yihiin. Mustaqbalka ayaa kula noqda mid aan la hubin, oo waxaa qasab kugu noqonaya inaad goaan ka gaarto arin aan waagii horre ku khuseeyn. Waxaa isku mar ku qabsata xaalad laba waji leh oo mar aad ku doonayso inaad taageerto wiilkaaga ama gabadhaada , adigoo isla markaana abaaraya sidii aad xal ugu heli lahayd dareen-kaaga iyo walwalkaaga ku saabsan arintan. Wixii waayadii horre kuula muuqday dhibaato "dadka kale " khuseeysa ayaa waxay isku badashaa mid aad kuugu dhow.

Waxaa dhacaysa in hadhoow qoyskaaga , saaxiibadaa, dariskaaga , iyo dadka aad wada shaqaysaan ay kaala hor yimaadaan oo ku waydiiyaan arintan. Badanaa waalidiinta arintani qabsato waxay raadiyaan qof ay arintan iyo fikirkeeda la qaybsadaan, laakiin intooda badan ma yaqaanaan qof arintan oo kale ay soo martay oo ay la tashadaan. Marka arintan oo kale dhacdo waxaa qofku raadiyaa aqoon dheeri ah oo ku saabsan sidii uu u fahmi lahaa oo uu u aqbali lahaa una awoodi lahaa inuu la tacaalo xaaladan.

# Sidee loo wajihi karaa xaaladan cusub?

**Aqoon iyo nidaam xiriir**
Waa muhiim inuu qofku soo helo aqoon uu isaga saacido jaahilnimada iyo hubnaan la`aanshaha. gabadhaada ama wiilkaaga ayaa aragti kaa siin kara kuna fahamsiin kara sida ay tahay marka qofku ka helo ama dareenkiisu soo jiito qofka ay isku jinsiga yihiin. Waxaa kaloo tusaale ahaan inter-nett-ka laga heli karaa macluumaad ku saabsan moowduucan.( ka eeg warbixin taas ku saabsan warqadan gadaasheeda), waxaad kaloo ka heli kartaa macluumaadkaas maktabadaha, xarumaha ururada ay ka mid yihiin sida Skeiv verden , ururka xoreeynta khaniisiinta raga iyo haweenkaba leh, iyo maamulada hay`adaha caafimaadka.

Xusuusnoow arrintan keli kuma tihiin. Xiriir la soo samee waalidiinta iyo qoysaska xaaladaada oo kale ku jira, adigoo taas u soo maraya kooxaha xiriirka ee ku xusan warqadan dhinaceeda midigta, si aad u hesho aqoon, iskuna waydaarsataan xirfadihiina.

**Dareen dambiyeed**
Waxaa banaanka yimaada dareemo badan marka waalidku ka war helo in gabadhooda ama wiilkoodu uu yahay khaniis. Dafiraad, shoog, xanaaq, dareen dambi, dareemadaas oo caadi qaata waqti dheer in laga shaqeeyo. Waalidiinta qaarkood ayaa dareema inay iyagu dambi ku leeyihiin in ilmahoodu khaniis noqdo, oo waxay is dhahaan: Maxaa khalad ah oo aan sameeyay? Maxaan arintan ka qaban karay? Waa muhiim inaad ogaato inaysan jiran wax aad sameeysay oo khalad ah, ama si kale wax uga qaban kartay , ama aad wax ka badali kartid khaniisnimada ilmahaaga.

*" Waxaan ku riyoodaa in la i aqbalo. waxaan ku riyoodaa in Pakistaanta iyo muslinkuba ay fahmaan in khaniisiintu aanay dooran inay khaniis noqdaan, ee sidaa ayaan nahay"*
Hadalkan waxaa yiri qof khaniis ah oo asalkiisu yahay Pakistani.

**Aqbalid iyo taageerid**
Waxaa bulshada dhexdeeda ka jira iska necbaan badan oo aan sabab lahayn oo ku aadan khaniisnimada iyo khaniisiinta. Sababtaas aawadeed ayay khaniisiinta badankoodu uga leex leexdaan inay qirtaan ama sheegtaan khaniisnimadooda. Taas oo ay u samynayaan cabsi ay ka qabaan awadeed in la diido, la dhibo, ama laga dhex takooro oo laga dhex saaro qaraabadooda iyo dadka ay xiriirka la leeyihiin. Ogsoonoow in gabadhaada iyo wiilkaagu soo mareen hanaan ama geedi dheer oo adag , oo ay shuruud ku noqotay inay naftooda iyo adinka waalidka ahba u qirtaan khaniisnimadooda. Sidaas aawadeedna waa muhiim in waalidku siiyo aqbalida iyo taageerada ay u baahan yihiin. Ilmahaagu wuxuu ku tusay inuu kalsooni kuu hayo markuu kuu sheegtay arintan, adigana waxaa haboon inaad ilmahaaga ku sharfanaato fur furnaanta ilmahaaga oo adna tusto kalsooni tiisa ku haboon.

**Jacaylka**
Jacaylku waa wax muhiim u ah qof kasta, xusuusnoow in ilmahaaguna u qalmo si taas la mid ah. In ay guursadaan wax kama badeli doonto gabadhaada ama wiilkaaga jinsiyadooda oo taasi waxay xitaa khiyaamo ku noqonaysaa qofkay guursadaan. Waa suurtogal inuu qofku nolol wanaagsa ku noolaado isagoon guursan, aadamiguna wuxuu ququuq u leeyahay inuu doorto qofkii uu nolosha la qaybsan lahaa, iyo qofkuu guursan lahaa.

**Ku wargalinta ama u sheegida dadka kale**
Wadahadal kala samee gabadhaada ama wiilkaaga goortii iyo sidii ay ku haboon tahay in dadka kale loogu wargalin lahaa ama sheegi lahaa arintan. Waa in la sugaa ilaa inta labada dhinacba ay ku kalsoonaan karaan in dadka kale la wargaliyo.Xusuusnoow in xitaa dadka kugu dhow dhow ay u baahn yihiin wakhti ay ku aqbali karaan oo ku wajihi karaan arintan.

*» Waan carooday markay Mona ii sheegtay inay tahay dumarka jecel dumarka kale ama lesbisk, waxaan ka fakiray waxay dariska iyo saaxiibaday igu oran lahaayeen, waxaan is iri caruur aad ayeeyo u noqoto ma heli doono. Waxay igu qaadatay dhoowr bilood inaan fahmo in arintani shakhsiyadayda khuseyn, laakiin arintani ay khuseeyso nolosha Mona iyo xuquuqda ay u leedahay inay farxad ku noolaato»*
- Hooyo ayaa ereyadan tiri

(Waxaa jumladan laga soo qoray buuga warbixinta ee » Glad i deg uansett», oo uu daabacay ururka L.L.H)

## Ma la socotaa:

**In qiyaas ahaan 3 ilaa 5 % boqolkiiba dadka dunidan ku nool ay ka helaan ama dareenkoodu soo jiito qof ay isku jinis yihiin. Arintani ma aha mid aan caadi ahayn ama ka hor imaanaysa dabeecada adaanaha, laakiin arintani waa mid ka jirta dhamaan dalalka aduunka iyo dhaqamada aduunkaba. Magaalada Oslo waxaa degan qiyaas ahaan 130 000 oo loogu yeero jaaliyadaha ajaanibka ah. Hadii la eego tirooyinka guud ee cilmi baarista arintan ku saabsan in u dhaxaeeysa 4000 ilaa 6500 oo kuwaas ka mid ah ayaa noqonaya khaniisiin.**

## Contact a network group!

Waxaa meel walba oo kugu dhow wadanka oo dhan ka jira kooxo ay waalidka iyo qoysasku xiriir la soo sameeyn karaan , badanaa kooxahaasi waxay hoos yimaadaan ururka xoreeynta khaniisiinta raga iyo haweenkaba leh. Oo barta inter-nett-koodu yahay: (www.llh.no)

Kooxahan waxaa ka dhexeeya oo ay ka siman yihiin inay caawiyaan waalidka iyo qoysaska xiriirka la soo sameeya , waxayna u shaqaynayaan sidii qof walba uu si xoriyad leh ugu noolaan lahaa noloshiisa sida waafaqsan xuquuqul aadanka.

Hadaad doonayso inaad xiriir la soo sameeyso kooxahan waxaad ogaataa in kooxahani uu saaran yahay waajib xog qarin ah, waxaanad noqon doontaa qof aan la garan oo 100% qarsoon.

### Warbixin ku saabsan meelaha aad la soo xiriiri karto:

**Xiriirka qoyska, Oslo**
Taleefoon lambarkoodu waa: 473 88 882
Cinwaanka e-mail-koodu waa :
oslo.familienettverk@llh.no
Bartooda inter-nett-ka waa :
www.llh.no/LLH_der-du-bor/Oslo_og_Akershus/undergrupper/Familie-nettverket/

**Skeiv Verden**
**- Waa koox urur oo ay ku xiriiraan khaniisiinta jaaliyadaha ajaanibka, waxayna leeyihiin koox muslimiintu koox u gaar ah**
Taleefoon lambarkoodu waa: 928 95 737
Cinwaanka e-mail-koodu waa : info@skeivverden.no
Bartooda inter-nett-ka waa : www.skeivverden.no

**Kooxda kaniisada dadweynaha u furan**
Taleefoon lambarkoodu waa: 928 95 737
Bartooda inter-nett-ka waa : www.apenkirkegruppe.org

**Kooxda caalamiga ah ee caafimaadka iyo bulshada(IHSG):** Taleefoon lambarkoodu waa :
22 68 07 00 ama 977 85 733
Cinwaanka e-mail-koodu waa : post@ihsg.no